Waxaad xaq uledahay inaad hesho liiska qolyaha aan lawadaagnay macluumaadkaaga caafimaadka, sababo kabaxsan daawayntaada, qarash bixinta, hawlaha daryeelka caafimaadka ama mararka aad si gaar ah ufasaxdo faafinta macluumaadkaaga, markaad soo dirsato codsi qoran oo aad liiska kudalbanayso. Codsiga waa inaad kusheegtaa waqtiga aad doonayso, kaasoo ay tahay inuu kayaraado 6 sano kana bilaabanaaya bisha Abriil 14, 2003. Liiska codsiga faafinta ee ugu horeeya mudo 12 bilood ah ayaa si bilaash ah laguu siinayaa; codsiyada kale ee dheeraadka ah waxaa laga jarayaa qarashaadka kubaxa soo dabicida liiska. Waan kuusoo sheegaynaa qarashka lagaa qaadaayo kahor intaadan wax qarash ah galin.

Hadii ogaysiiskaan laguusoo diray adiga sigaar ah, **waxaad xaq uleedahay in lagu siiyo koobiga daabacan ee ogaysiiskaan.**

Waxaad xaq uleedahay inaad dalbato in macluumaadka caafimaadkaaga lagaala hadlo si qarsoodi ah, sida in boosto laguugu diro ciwaan ahayn kan gurigaaga, adoo si qoraal ah noogu sheegaaya qaabka ama goobta gaarka ah ee aan kaalasoo xariirayno.

Waxaad codsankartaa, si qoraal ah, inaanaan isticmaalin ama aanaan faafin macluumaadkaaga caafimaadka sababo laxariira daawayntaada, qarash bixinta ama hawlaha daryeelka caafimaadka ama aanaan siin shaqsiyaadka kulug leh daryeelkaaga marka laga reebo inaad si gaar ah adigu ufasaxdo, marka sharcigu dalbado, ama markay xaalad degdeg ah jirto. Waxaan tixgalinaynaa codsigaaga **laakiin sharci ahaan qasab naguma aha inaan aqbalno.** Waan kuusoosheegaynaa go'aanka aan kaqaadano codsigaaga. Dhamaan codsiyada qoran ama racfaanada waa in loogudbiyaa Xafiiskeena arimaha Shaqsiga ah. Hawlahaan haqsiga ah waxay jireen lagasoo bilaabo bishii Abriil 14, 2003.

Cabashooyinka/Su'aalaha

Hadaad walaac kaqabto in armahaaga shaqsiga ah lagu xadgubay, ama aadan kuqanacsanayn go'aanada aan kagaarno helitaanka diiwaanadaada macluumaadka, waxaad kala xariiri kartaa xafiiska Gudoomiyaha Caafimaadka:

Waaxda Caafimaadka Bulshada ee Franklin County
280 East Broad Street
Columbus, Ohio 43215

Taleefanka: (614) 525-3670
Fax: (614) 525-6672
E-mail: fcph@franklincountyohio.gov

Ugu danbayn, waxaad cabasho qoran udiri kartaa Xafiiska Xaquuqda Madaniga ah ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadka ee Maraynkanka. Waxaad wici kartaa 1-866-627-7748 si aad uhesho xaruntooda meeshay kutaalo.

Marnaba xaaladkastooy tahayba laguma ciqaabi karo ama lagaagama aargoosan karo inaad cabasho gudbisay awgeed.

Macluumaadka arimaha shaqsiga ah waxaa laga helaa webseetka www.myfcph.org.

Qaybta Foomka Ogolaanshaha:

Helitaanka Ogaysiiska Macluumaadka Arimaha Shaqsiga ah

Waxaan akhriyay iyo/ama la iisharxay xuquuqdayda iyo waajibaadka isaaran ee la xariira macluumaadkayga caafimaadka. Anoo hoos saxiixaaya, waxaan xaqiijinayaa inaan helay Macluumaadkaan Kooban ee Ogaysiiska Hawlaha Shaqsiga ah.

Magaca Ugu dabeeya: _____

Magaca Koobaad: _____ **M.I.** _____

Saxiixa: _____

Taariikhda: _____/_____/_____

Franklin County
Public Health

Ogaysiiska Arimaha Sharsiga ah Macluumaadkooda oogooban

Lamuraajaceeyay Abriil 2018

OGAYSIISKAAN WUXUU SHARXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE KUGU SAABSAN LOO ADEEGSAN KARO AMA LOOFAAFIN KARO IYO SIDA AAD MACLUUMAADKAAN KUHELI KARTO. FADLAN SI TAXADAR LEH UFIIRI.

Hadaad qabto wax su'aalo ah, fadlan kafiiri qaybta Cabshada/Su'aalaha ee dhabarka danbe ee waraaqdaan si aad uhesho macluumaadka lagala xariiraayo.

Yaa lasoconaaya ogaysiiskaan?

Waaxda Caafimaadka Bulshada ee Franklin County (FCPH) waxay daryeel caafimaad siisaa bukaanadeena, dadka deegaanka, iyo macaamiisha ayadoo kaashanaysa dhakhaatiir iyo khubaro kale oo caafimaad iyo ururo. Hawlaha macluumaadka shaqsiga ah ee ogaysiiska kuqoran waxaa lasoconaaya:

- Khabiir kasta oo caafimaad oo kugu daaweeya xurun kamid ah xarumaha caafimaad ee FCPH ay maalgaliso.
- Dhamaan qaybaha FCPH.
- Dhamaan ururada lashaqaaysiiyay, shaqaalaha ama mutadawiciinta FCPH.
- Cidkasto oo xariir ganacsi laleh iskaashi laleh FCPH kuwaasoo aan lawadaagno macluumaadka caafimaadka.

Balanqaadka aan kuusamaynayno

Waan ognahay in macluumaadkaaga caafimaad uu yahay mid shaqsi ah, waxaana kudadaalaynaa inaan xifdino. Waxaan abuuaynaa diiwaan lagu qoro daryeelka iyo adeegyada aad hesho si aan daryeel tayo leh kuusiino aana u ilaalino shuruudaha sharciga. Ogaysiiskaan wuxuu quseeyaa dhamaan diiwanada daryeelkaaga ee aan hayno, hadii ay shaqaalaha FCPH abuuren ama uu dhakhtarkaaga gaarka ah abuuray. Sharcigu wuxuu naga doonayaa:

- Inaanaan cidna tusin macluumaadkaaga caafimaad ee gaarka ah.
- Inaan kusiino ogaysiiskaan oo kahadlaaya waajibaadka sharci ee nasaaran iyo talaabooyinkeena arimaha shaqsiga ah ee laxariira macluumaadkaaga caafimaad.
- Lasoco shuruudaha ogaysiiska ee hada falgalaaya.

Isbadalada kudhaca ogaysiiskaan

Waxaan badali karnaa siyaasaadkeena arimaha shaqsiga ah xili kasta. Isbadalada waxay saamaynayaan maclumaadka caafimaad ee aan horay uhaynay, iyo si lamid ah macluumaadka cusub kadib marka isbadalada dhacaan. Kahor intaanaan isbadal muuqda kusamayn siyaasadeena arimaha shaqsiga ah, waxaan isbadal kusamaynaynaa ogaysiiska waxaana ogaysiiska cusub kusoo daabacaynaa meelaha dadwaynuhu arki karo ee kuyaala xarumaha caafimaadka. Waxaad heli kartaa nuqulka ogaysiiska hada jira ama siyaasada xili kasta. Taariikhda ay isbadaladu dhaqan galayaan waxaa lagu qoray qaybta hoose ee ciwaanka. Waxaa lagu siinayaa nuqul kamid ah ogaysiiska hada marka koobaad ee aad iska qorto xarunta ama goobta cafimaad si lagaaga daaweeyo. Waxaa sidoo kale lagu waydiisaynayaa inaad xaqiijiso si qoraal ah helitaanka ogaysiiskaan.

Sida aan u adeegsan karno ama ufaafin karno macluumaadkaaga caafimaadka

FCPH waxay kaqaybgalaysaa Isdhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka ee CliniSync o Ohio kadhacaaya. Dhakhaatiirtaada iyo daryeel bixiyaasha caafimaadka waxay adeegsan karaa nidaamkaan elektarooniga ah si ay si amaan ah kuusiiyaan galitaanka diiwaanadaada caafimaadka si aad uhesho baahiyahaaga caafimaad.

Anaga iyo khubarada kale ee caafimaad ayaa fasixi kara isticmaalka macluumaadkaaga caafimaad ayagoo adeegsanaaya Nidaamka Isdhaafsiga Macluumaadka Caafimaadka ee CliniSync si ay kuu daaweeyaan, qarash ubixiyaan ama hawlaha daryeelka caafimaad lagu qabto.

Hadaad qabto su'aalo ama aadan doonayn in macluumaadkaaga dadka kale lalawadaago, fadlan laxariir FCPH (614) 525-3670.

Waxaan adeegsan karnaa ama faafin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka **adigoon** fasax hore bixin sababo dhawr ah awgood. Anagoo raacayno shuruudo gaar ah, waxaan cid kale siin karnaa macluumaadkaaga caafimaad adoon marka hore bxinin ogolaansho **sababo laxariira caafimaadka dadwaynaha** (muraaqabaynta caafimaadka bulshada, baaritaanka, ama lasocoshada), **warbixinada xadgudubka ama dayaacaada, xisaabaadka dhanka lasocoshada iyo kormerka caafimaadka, darsaadka cilmi baarista, qaban qaabinta tacsida iyo deeqda xubnaha jirka, sababo laxariira bixinta xaquuqda shaqaalaha, iyo xaaladaha degdega ah.** Waxaan sidoo kale faafinaa macluumaadka caafimaadka **marka sharcigu naga dalbado**, sida markaan kajawaabayno codsi noga yimid laamaha sharci fulinta xaalado gaar ahna laxariira, ama markaan kajawaabayno awaamiirta saxda ah ee maxkamada ama maamulka.

Waxaan sidoo kale kuulasoo xariiri karnaa **inaan kuxasuusino balamaha dhakhtarka**, ama aan kuusheegno ama kuusoojeedino **dookhyada daawaynta ee macquulka ah, ikhtiyaaraadka kuufuran, gunooyinka laxariira caafimaadka ama adeegyada** kuwaasoo aad xiiso uqabi karto.

Waxaan siin karnaa macluumaadkaaga caafimaad **saaxiib ama xubin katirsan qoyskaaga oo kulug leh daryeelkaaga caafimaad**, ama saraakiisha gurmadka masiibooyinka si markaas qoyskaaga loogu sheego goobta aad joogto iyo xaalada aad kujirto.

Arimaha kale ee loo isticmaalo macluumaadka caafimaadka

Xaalad kale oo kasta oon lagu sheegin ogaysiiskaan, waxaan kaadalbanynaa ogolaanshahaaga oo qoraal ah kahor intaanaan isticmaalin ama faafin macluumaadkaaga caafimaadka. Hadaad dooratay inaan fasaxdo isticmaalka ama faafinta, hadhoow waad kanqon kartaa fasaxaas adoo qoraal noogu sheegaaya go'aankaaga.

Xuquuqdaada ku aadan macluumaadkaaga caafimaad

Inta badan, **waxaad xaq uleedahay inaad fiiriso hesho nuqulka macluumaadka caafimaadka** ee aan u adeegsano gaarista go'aanada laxariira daryeelkaaga, markaad soogudbiso codsi qoraal ah. Hadaad dalbato nuqulada diiwaanka, waxaan kaaqaadi karnaa qarashka kubaxa koobiyaynta macluumaadka, kan boostada ama qarashaadka kale ee laxariira. Hadaan diidno codsigaaga ah inaad akhrisato ama hesho nuqulka macluumaadkaaga, waxaad dirsan kartaa codsi qoran oo aad kudalbanayso inaan in dib u eegno go'aankeena.

Hadaad aaminsantahay in macluumaadka kuqoran diiwaankaaga ay tahay mid khaldan ama hadii macluumaad muhiim ah kamaqanyahay, **waxaad xaq uleedahay inaad naga codsato inaan saxno diiwaanadaada** adoo codsi qoraal ah soodiraaya aadna kusheegayso sababata aad isbadalada ucodsanayso. Waan diidi karnaa codsigaaga ah inaan isbadalo kusamayn diiwaanka hadii aanaan anagu abuurin macluumaadka; haduusan qayb ka ahayn macluumaadka caafimaad ee aan anagu hayno; ama hadii aan go'aansano in diiwaanku yahay mid saxan. Waxaad racfaan kaqaadan kartaa adoo qoraal kugudbinaaya, go'aanka aan gaarno ee ah inaanaan samayn isbadalada aad codsatay.